


FAAFINTA
الرسمية



RASMIGA
الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 12-aad. Garowe 25 July, 2010

Lam.7

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudahiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA
Qaybta Koowaad

Sharci

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Sharci Lr.3. ee 25/July/2010, kuna saabsan Heesta Calanka Puntland.

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



PUNTLAND STATE OF
SOMALIA
OFFICE OF THE
PRESIDENT

Sharci Lr.3 ee 23, July, 2010 Kuna saabsan Heesta Calanka Puntland.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay : Dastuurka Dawladda Puntland qodabkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGG/DPL/66/2010 ee 12/July/2010.

Markuu dersay: Baahida loo qabo in Puntland yeelato heesta Calanka ee gaarka u ah.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha wakiiladdu waxay ansixiyeen Heesta Calanka Puntland

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keedinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan qaryaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Golaha Wakiilada.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaasoo ka mid noqonaya shuruucda Dawladda, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

Qodobka 4-aad

In Heesta Calanka Puntland laga baahiyo dhammaan idaacadaha Puntland iyo Jaraa'idkaba.

Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Farole)
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Golaha Wakiillada

House of Representatives

Xafiiska Guddoomiyaha

Office Of the Speaker

Ref:- XGGW//DPL/ 66 /2010

Date:- 12/07/2010

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Heesta Calanka Puntland

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa **64-aad**

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Xeer Madaxweyne Ir, 28
13/March/2010 kuna saabsan Heesta
Calanka Puntland.

MARKUU TIXGELIYEY:-

Baahida loo qabo in ay yeelato Puntland
hees u gaar ah.

MARKUU DHEGAYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Heesta Calanka Puntland.

Allaa Mahad Leh.

**C/rashiid Maxamed Xirsi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**



Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Heesta Calanka Puntland

Abwaan

Cabdulaahi Maxamed Jibriil

oooOooo

**Calanyohow babanayaa
Waxaa kuu calaamada
Buluugii cawaaliyo
Caddaan nabad matala iyo
Cagaar doog u yaalliyo
Barwaaqaad ku caan tahay**

**Waa cosob dalkaagani
Cood iyo dhul-beereed
Caaniyo cadiin badan
Cimiladu macaan tahay
Cirifyadana bada ku leh**

**Casha maydigeediyo
Buuraha ku caashaqan
Cadceeduna dul joogtaa
Caalamka iyo duniduba
Kugu wada ciseeyaan**

**Ciidaadu waa hodan
Caraf iyo udgoon badan
Puntland baad u curataye
Cawo iyo ayaan side
Cimrigaa ha dheeliyin**